Xafiiska Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimmaha Siyaasada Soomaaliya (UNPOS)

**Warqad ku socota Soomaalida Qurbaha ku nool (No. 20)**

Nayroobi, 27 November 2009

As-salaamu Alaikum,

Saaxiibayaal, Iga Gudooma Salaan diiran,

1. Waxaan munaasabadda Ciidul Ad-ha u dirayaa tahniyad iyo salaan diiran dhamaan dadweynaha Soomaaliyeed meel walba oo ay joogaan.

2. Eidul Ad-ha waa markii uu Ilaahay soo dejiyey aayadda Qur'aanka Kariimka ah ee oraneysa "Maanta waxaan idiin dhameystiray diintiina, nicmadaydiina aan idinku hagoogay, diinta Islaamkana aan idiin doortay in ay tahay diinta keliya ee aad leedihiin." S-5/V3. Maanta waa maalin muhim ah oo ku haboon in la ciido, oo ay dadku isu hambalyeeyaan, isna cafinaaan, isna jeclaadaan.

3. Sida aan wada ogsoonhay, idinkuna aad ku faantaan, dadka Soomaaliyeed waa dad isku diin ah, isku mad-hab iyo isku dariiqo ah. Soomaalidu waxay ka mid yihiin dadkii ugu horeeyey ee Diinta Islaamka qaatay. Kun iyo Afarta boqol oo sannao (1400ta) ee ay Diinta Islaamku jirtayna, weligiina khilaaf dhinca diinta ah idinma dhexmarin, haba yaraatee. Hase-yeeshee, maantana aduun weynuha oo dhan wuxuu ka xun yahay kana xanuunsanayaa isdilka iyo iska-horimaadka aan loo baahnayn ee socdaya iyada oo la adeegsanaya magaca Islaamka. Hadaba maanta anagoo munaasabaddan qiimaha leh ee Soomaaliya ka jirta ka faa'iideysaneyna waxaan ugu baaqaynaa dadka Soomaaliyeed ee kala jooga dunida dacalladeeda inay midoobaan, iskaashadaan, kana feejignaadaan cadowga gudahooda ah ee isku diraya, isku tanaasulaan, isa saamaxaan kala dambeeyaan si ay Soomaaliya dib ugu hanato sharafteedii hore iyo si ha fiican ba.

4. Maanta oo aan ciidayno bal aan xusuusano dadka Soomaaliyeed ee qaxootiga ah iyo kuwa dalka gudihiisa ku barakacsan oo meelkasta ku kala daadsan oo ay abaaruhu waxyeeleeyeen, una nugul qabowga iyo kuleylka oo ay ku jiraan haween, caruur iyo dadka da'da ahba oo laga qaxiyey guryahoodii iyo magoolooyinkoodii. Waxaa kaloo xusid mudan boqolaalka Soomaaliyeed ee dhalinyarada ah ee naftooda ku biimeynaya Badda Cas iyo tan Mediterranean-kaba iyagoo ka carararaya dagaallada dalkooda ka jira. Sidoo kale maanta oo ah maalin ciid ah aan xusuusano boqolaalka haweenka iyo caruurta ah ee maanta ugu jira xabsiyada aduunka dacalladiisa si ay u helaan nolol wanaagsan. Waxaan ugu baaqayaa Ummadda Soomaaliyeed inay maskaxda ku hayaan dadka aan soo sheegnay, walaalihiina, una hawlgashaan sidii midnimo iyo nabad loo dhan yahay loo heli lahaa, qaxootiguna dib ugu noqon lahaa

guryohooda, carruurtiinana ay u joojin lahaayeen iany badda isku daadiyaan. Arrintan waxaa keliya lagu gaari karaa in nabad iyo xasillooni lagu soo celiyo Soomaaliya.

5. Maanta oo ah maalin ciid ah waxaan ku faraxsanahay inaan arko soo deynta suxufiyiinta aan waxba galabsan ee afduubka loogu haystay mudo ka badan hal sanno. Sida aayada kor ku tilmaman ay sheegeyso, illaahey wuxuu ku galadeystay wadankiina nicmadiisa, wuxuuna idin siiyey kheyraad fara badan sida macdano kala gedisan, dhul-beereed iyo xoolo iyo dad caqli badan leh oo waxtarna leh. Waxaan rejeynayaa in aad indho u yeelan doontaan arrimmaha aan idin soo sheegay, aadna ka faaiideysan doontaan kheyraadka eebe idin siiyey. Kheyraadkaas waxay keenayaan hanti wax ku ool ah oo ka sharafban colaadaha ama hawllaha sharci darada ah.

6. Waxa dhowaan dib loo bilaabay, markii ugu horesay mudo dheer in xoolaha Soomaaliyeed loo dhoofiyo dalka Sacuudiga. Dhab ahaantii ciidaani kumnaan xoolo Soomaaliyeed ah aya la geen doonaa Boqortooyada Sacuudiga si Xojaaydo ugu faa'iideystaan. Waxaan shaki lahayn inay arrintani ay kor u qaadi doonto nolosha qoysas fara badan oo Soomaaliyeed oo noloshoodu ku tiirsantahay xoolaha nool. Arrintan waxay si guud kor ugu qaadaysaa dhaqaalaha waddanka. Waxaa kale oo aan rajaynayaa inay noqoto hab kale oo ay dhallinyada Soomaaliyeed ay ku helaan nolol kale.

7. Toddobaadkan waxaa kale oo aan ku faraxsanahay inaan aragno waddankiina oo xiriir la yeeshay Bangiga Horumarinta Afrika. Bangiga Horumarinta Afrika wuxuu siiyay waddankiina 2 milyan oo doolar oo deeq ah, taasoo caddeynaysa sida uu u aqoonsanyahay dedaalka Dowladda Federaalka Ku Meel Gaarka Soomaaliyeed ay ugu jirto inay xoojiso hay'adaheeda iyo baahida loo qabo in laga taageero dowladda inay si buuxda gacanta ugu dhigto magaalada Muqdisho.

8. Maadaama aan haysano horumarkan tallaaba tallaabada isu soo taraya, waa inaanu rajaynaa una ducaynaa in Soomaaliya ay waqti dhow hesho dowlad habboon, Soomaaliduna ay hesho nabad waarta iyo barwaaqo, dadka Soomaliyeedna sanadkan sannadkiisa ay ciidaan waddankooda iyagoo haysta raynrayn, horumar, nabad iyo barwaaqo..

Wallaalkiin,
Ahmedou Ould-Abdallah